# Ogeysiinta Sanadlaha ah ee loogu talagalay Horumarinta Sinnaanta Waxbarasho ee Ardayga (SEED) ee Oregon

## KOR U QAADIDA CODKA ARDAYGA

Waaxda Waxbarashada ee Oregon waxaa si qoto dheer uga go'an ka caawinta arday kasta waxbarashada, kobaca, iyo horumarka. ODE waxaa sidoo kale ka go'an bixinta fursado loogu talagalay jawaab celin iyo talo si hab joogto ah loogu wanaajiyo waayo-aragnimada waxbarasho ee dhammaan ardayda Oregon. Ra'yi ururinta Horumarinta Sinnaanta Waxbarasho ee Ardayga (SEED) waxay ODE ka caawin doontaa isku soo ururinta macluumaad ku saabsan waayo-aragnimada waxbarasho ee ardayda Oregon. Macluumaadkani wuxuu ODE ka caawin doonaa in ay dejiso ilaha iyo taageerooyin ku habboon oo loogu talagalay degmooyinka ku yaala Oregon, iyo in si fiican loo hiigsado ilahaasi meelaha inta badan loogu baahan yahay. Xogta Ra'yi ururinta SEED waxaa sidoo kale dhici karta in ay gacan ka geysato in degmooyinka dejiyaan sawir buuxa oo ku saabsan xaaladaha degaankooda oo ay wax ka beddel istaraatiijiyadeed ku sameeyaan manhajka, waxbarashada, iyo taageerooyinka tacliimeed ee la xiriira ee ay siiyaan ardayda.

## RA'YI URURINTA SEED…

- **…waxay bixisaa fursad si toos ah wax loogaga dhageysto ardayda.** Ra'yi ururinta SEED waxay ardayda siisaa fursad ay ku muujiyaan waayo-aragnimadooda dhanka nidaamka waxbarashada ee Oregon.
- **…waxaa loogu talagalay in lagu qabto dareenka ka tirsanaansho iyo waayo-aragnimo ee ardayda marka la joogo dugsiga.** Ra'yi ururintu waxay ardayda wax ka weydiisaa helitaankooda ilaha waxbarasho, fursadaha waxbarasho, aaminsanaanta isku-filnaansho ee qofka, iyo dareenka ah in ay wax ka qayb ka yihiin.
- **…waa mid la heli karo si loo buuxiyo baahiyaha dhammaan ardayda.** Ardaydu waxay heli karaan taageerooyin la mid ah helitaankooda kuwaasi oo diyaar u ah iyaga oo ku saabsan qiimeynta gobolka oo dhan. Ra'yi ururinta SEED oo beddel ah ayaa sidoo kale la helayaa, oo loogu talagalay ardayda qabta naafanimada dhanka garashada ah oo la taaban karo.
- **…waxay qaadataa 10-20 daqiiqo si loo dhammeystiro.** Ra'yi ururinta SEED waa mid kooban waxayna ka kooban tahay su'aalo badan oo la kala dooranayo oo loogu talagalay fasallada 3-11 iyo su'aalo aan xad lahayn 'open-ended questions' oo dheeraad ah oo loogu talagalay fasallada 6-11.
- **… waa mid qarsoodi ah**. Waalidiinta ama mas'uuliyiinta ku jira ra'yi ururintu waa kuwo qarsoodi ah marka laga reebo ardayga oo tilmaama in ay waxyeello suurtagal ah u keenayso ardayda iyo dadka kale. Marka jawaabta loo asteeyay in ay tahay digniin dhibaato imaan karta, jawaabta ardayga waxaa lala wadaagaa shaqaalaha dugsiga degaanka si loo xaqiijiyo badbaadada ardayga. Marka laga reebo xaalad digniineed oo ah dhibaato imaan karta, jawaabaha shakhsi ahaaneed ee ardayga ee ku saabsan Ra'yi ururinta SEED lalama wadaago dugsiga, degmada iyo heerarka gobol. Ra'yi ururinta SEED waxaa si ammaan ah loogu keydiyaa oo oo fiiriya oo kaliya dhowr ka mid ah xubnaha shaqaalaha ee jooga ODE iyada oo ujeedada laga leeyahay tahay falanqeynta xogta iyo diyaarinta xogta ra'yi ururinta si loogu soo sheego hab ilaalinaya qarsoonimada ardayga.

## SHARAXAADA XUQUUQDA

Sharciga Oregon (Sharciga La Soo Jeediyay ee 2656) wuxuu dugsiga degmada oo kasta uga baahan yahay in ay Ra'yi ururinta SEED ka dhigaan mid ay heli karaan ardayda fasallada 3-11. Waalidiinta ama mas'uuliyiinta waxay, dhanka afka ama qoraal ahaan ku diidi karaan, in ardaygoodu ka qayb qaato Ra'yi ururinta SEED. Dugsiyadu waxay waalidiinta siin doonaan ogeysiinta maamulka iyo nidaamka loogu talagalay diidmada ka qayb qaadashada ugu yaraan 5 maalmood ka hor maamulka Ra'yi ururinta SEED. Ardaydu waxay sidoo kale, wakhti kasta, dhanka afka ama qoraal ahaan ku diidi karaan in ay ka qayb qaataan. Ardaydu waxay sidoo kale diidi karaan in ay ka jawaabaan su'aalaha shakhsi ee ku saabsan Ra'yi ururinta SEED.

# Foomka Ra'yi ururinta Ka qayb qaadashada SEED

## WAQTIGA LA SAMEYNAYO MAAMULKA GOBOLKA OO DHAN

Ra'yi ururinta SEED waxaa lagu qaban doonaa waqtiga laga sameynayo gobolka oo dhan ee hoos lagu tilmaamay. Dugsiyada iyo degmooyinka ayaa go'aamin doona maalmaha iyo wakhtiyada maamulka gaarka ah.

**Fasallada 3-11**

02/04/2025 — 06/13/2025

## LA SOCO WARKA

Wixii la xiriira macluumaadka iyo si dib loogu eego Ra'yi ururinta SEED, booqo bogga internet-ka Ra'yi ururinta SEED ee Waaxda Waxbarashada ee Oregon ama iskaan garee code-ka QR ee dhanka midig. Shaqaalaha dugsiga iyo degmada ayaa ka jawaabi kara su'aalaha dheeraadka ah.

I ISKAAN GAREE

## XUQUUQDA WAALIDKA/MAS'UULKA EE LOOGU TALAGALAY KA QAYB QAADASHADA RA'YI URURINTA

Sharciga Oregon (Sharciga La Soo Jeediyay ee 2656) ayaa waalidiinta ama mas'uuliyiinta u oggolaanaya in ay, dhanka afka ama qoraal ahaan ku diidi karaan, in ardaygoodu ka qayb qaato Ra'yi ururinta SEED. Dugsigu waa in arday kasta oo laga cafiyay ka qayb qaadashada Ra'yi ururinta SEED siiyaa waqti wax barasho oo kor lagala socdo (ama hawl waxbarasho oo kale) inta ardayda kale ay buuxinayaan ra'yi ururinta.

- Haddii aad jeclaan lahayd in ardaygaagu ka qayb qaato Ra'yi ururinta SEED, **looma baahna in la qaado tallaabo dheeraad ah**.
- Haddii aadan rabin in ardaygaagu ka qayb qaato Ra'yi ururinta SEED, **fadlan buuxi mid ka mid ah kala doorashada hoosta ku qoran**.
    - Si looga caawiyo in dugsiga ardaygaaga si hufan wax u qorsheysto, fadlan foomkan soo gudbi oo dugsiga ardaygaaga kula xiriir ugu yaraan hal maalin ka hor maalinta u horreysa ee sameynta ra'yi ururinta.

## DOORASHADA 1

Si aad ugu diido qoraal ahaan, fadlan buuxi qaybtan oo foomkani u soo celi dugsiga ardaygaaga.

Magaca Dambe ee Sharciga ah ee Ardayga: ______________________________________________

Magaca Hore ee Sharciga ah ee Ardayga: ______________________________________________

Fasalka Ardaygu Isqoray: ______________________________

Dugsiga Ardayga: __________________________________

# Ogeysiinta Sanadlaha ah ee loogu talagalay Horumarinta Sinnaanta Waxbarasho ee Ardayga (SEED) ee Oregon

Waan fahamsanahay in saxiixida aan saxiixayo foomkan in aan diidayo in ardaygaygu ka qayb qaato Ra'yi ururinta SEED ee loogu talagalay sanad dugsiyeedka hadda lagu jiro oo kaliya.

Saxiixa Waalidka/Mas'uulka: ____________________________________________ Taariikhda: ___________________

Magaca Waalidka/Mas'uulka Oo daabacan: _________________________________________________________________

## DOORASHADA 2

Si loo diido iyada oo la adeegsanayo dhanka afka, fadlan dugsiga ardaygaaga kula xiriir telefoon ahaan ama u soo booqo shakhsi ahaan. Fadlan isku diyaari in aad bixiso macluumaadka soo socda:

- Magaca sharciga ah ee ardayga (hore iyo dambe)
- Fasalka ardaygu isqoray
- Magacaaga (waalidka/ mas'uulka ardayga ahaan)
- Waa xaqiijin dhanka afka oo ah in aad jeclaan lahayd in aad diido ka qayb qaadashada Ra'yi ururinta SEED ee loogu talagalay ardaygaaga